

Pelvic Fracture

A pelvic fracture is when 1 or more hipbones are cracked or broken. Your hips or pelvis is made up of 5 bones. Many pelvic fractures are caused by:

- Car accidents
- Falls, injuries or sudden movement causing the muscle to tear away a piece of the hipbone

If you had an accident or other injury, you may have tests to see if you have injuries to your other bones or organs.

Signs of a Pelvic Fracture

- Bruising and tenderness
- Swelling
- Numbness or tingling in your genital area or in your upper leg
- Discomfort or pain when you stand

Your Care

Your pelvic fracture may need to be fixed with surgery or by putting pins into the bones from the outside. If you have other injuries, these may also be fixed during surgery. After you leave the hospital, you may need:

- Blood thinner medicine to prevent blood clots
- To limit your activity for several months
- To use crutches or a walker when walking to lessen the weight to help your bones heal
- Physical therapy to help your bones heal better and strengthen your muscles

Jabka Sinta

Jabka sintu waa marka mid ama in ka badan ee lafaha sinta ay dilaacaan ama jabaan. Sintaadu waxay ka kooban tahay 5 lafood. Jabka sinta intiisa badan waxa sababa:

- Shil baabuur
- Dhicitaanada, dhaawacyo ama dhaqaaq dhakhso ah oo keenaya in muruqu jabsado qayb ka mid ah lafta sinta.

Haddii shil ama dhaawac kale ku soo gaaray, waxa laga qaadi karaa baadhitaano si loo arko haddii ay jiraan dhaawacyo soo gaaray lafahaaga ama xubnahaaga kale.

Calaamadaha Jabka Sinta

- Cad go' iyo danqasho
- Barar
- Goobta cawradaada ama xagga sare ee lugtaada oo kabaabyo ama jiririco leh
- Raaxo-daro ama xanuun marka aad istaagan tahay

Daryeelkaaga

Waxa laga yaabaa in loo baahan yahay in sintaada jabtay lagu hagaajiyo qalitaan ama iyada oo biro dibadda laga soo galinayo lafahaaga. Haddii aad leedahay dhaawacyo kale, waxa laga yaabaa in iyagana la hagaajiyo inta qalitaanka lagu jiro. Marka aad cisbitaalka ka baxdid ka dib , waxa aad u baahan kartaa:

- Dawada khafiifisa dhiigga si looga hortago dhiigga oo xinjirooba
- In aad yareysid hawlahaaga mudo dhawr bilood ah
- Inaad isticmaashid qoryaha curyaanka ama qalab lagu socdo marka aad soconaysid si loo yareeyo miisaanka si sintaadu looga gargaaro inay bogsato
- Jimicsiyo daweyn ah si lafahaaga looga caawiyo inay bogsadaan isla markaana muruqyadaadu xoog u yeeshaan

Call your doctor right away if:

- You have sudden chest pain and trouble breathing.
- Your pain and swelling increase.
- You have a fever over 100.5 degrees F or 38 degrees C.

Talk to your doctor or nurse if you have any questions or concerns.

Wac dhakhtarkaaga isla markiiba haddii:

- Aad yeelatid xanuun laabta ah oo kadis ah iyo neefsashada oo dhib kugu ah.
- Xanuunkaaga iyo bararka oo kordha.
- Waxa aad leedahay qandho/heerkul ka sareeya 100.5 darajo F ama 38 darajo C.

La hadal dhakhtarkaaga ama kalkaalisada haddii aad qabtid su'aalo ama walaac.

2008 – 1/2013 Health Information Translations

Unless otherwise stated, user may print or download information from www.healthinfotranslations.org for personal, non-commercial use only. The medical information found on this website should not be used in place of a consultation with your doctor or other health care provider. You should always seek the advice of your doctor or other qualified health care provider before you start or stop any treatment or with any questions you may have about a medical condition. The Ohio State University Wexner Medical Center, Mount Carmel Health System, OhioHealth and Nationwide Children's Hospital are not responsible for injuries or damages you may incur as a result of your stopping medical treatment or your failure to obtain medical treatment.

Pelvic Fracture. Somali.